



**REF—MJ/FR/121/06**

**DATE: 11/03/2006**

### **Warsaxaaafadeed**

Ururka Midowga Jabhadda Xoraynta Soomaali Galbeed(UWSLF) isagoo ka ambaqaadaya ujeedooyinkiisa ku salaysan himilooyinka shacabka Soomaali galbeed wuxuu caddaynaynaa inuu soo dhoweynayo dadaalka ay wadaan odyaasha dhaqanka iyo salaadiinta Soomaaligalbeed ee ku aaddan xal u helidda dhibaatada dabadheeraatay ee waddanka S/galbeed.

Ururku wuxuu uga mahad celinayaa odyaasha sida xilkasnimada leh ee ay uga danqadeen dhibaatada dadkooda haysata uguna dhabar adaygeen dadaalkaas mudada dheer ay soo wadeen. Annagoo ugu baaqayna inay sii wadaan dadaalkaas kana digtoonaadaan jilaaf oyinka cadawga iyo wax kasta oo sumcadooda hoos u dhigaya dhuminayana danta dalka,diinta iyo dadka S/galbeed.

Waxaan u sheegaynaa shacabka S/galbeed inay maanka ku hayaan gumaysiga Ito biya inuu yahay sababta ugu wayn ee keentay dibindaabyada soo daashatay iyo saxariirka soo jireenka ah, isla markaana ay adagtahay in Itoobiya daacad ka noqoto dadaal kasta oo loo galo xal u helidda qaddiyadda S/galbeed, taasoo taariikhdu ka marag furayso.

Dhinaca kale wuxuu ururku ugu baaqayaa dadka S/galbeed inay isgacan qabtaan isagana gargaaraan abaarahaa ku habsaday , gaar ahaan jaaliyadaha dibaddu waa inay door weyn ka qaataan samatabixinta dadkooda ay abaartu ugu darmatay gumaysiga ragaadiyyay . iyadoo aan sidoo kale ugu baaqayno dadka S/galbeed inay joojiyaan colaadaha sokeeye ee dhexdooda ah, islamarkaana ay ogaadaan musiiboyinka dhacaya ooy ka mid tahay abaartu iyo colaaddu ay ku yimaadeen dunuubta iyo dulmiga dadku galabsdeen, looga bixi karo in Alle (swt) loo toobad keeno lagana baxo dunuubta lagu jiro.

Ugu danbayntii wuxuu ururku Alle (swt) ka baryayaa inuu ka dulqaado shacabka S/galbeed gumaysiga facooda ka reebay iyo abaarahaa ay ku jiraan.

**Allaahu Akbar – Guul , Cizi iyo Gobonimo .**

*Madaxa Xafiiska Xidhiidhka Dibadda  
C/naasir Sheekh*